




Somali Federal Republic
Ministry of Information, Culture and Tourism

Warbixinta Toddobaadlaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya Muqdisho, Arbaco, 17 April, 2024

- Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud oo booqday dugsiyada tababarka Ciidanka Xoogga Dalka ee Jeneral Dhaga-badan, TurkSom iyo Jeneral Daa'uud, halkaas oo ay ka amba-baxayaan cutubyo ku wajahan furimaha dagaalka iyo ciidamo tababar heerkiisu sarreeyo u aadaya dalka Turkiga.
- Ra'iisul Wasaare Ku-Xigeenka Soomaaliya Mudane Salah Ahmed Jama, ayaa ka qeyb galay xil wareejinta wasiirada cusub ee Wasaaradaha Amniga iyo Arrimaha Gudaha ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
- Wasiirka Arrimaha Dibedda Danjire Axmed Macallin Fiqi ayaa qaabilay Safiirka Jamhuuriyadda Turkiga Mudane Alper Aktaş oo booqasho sharafeed ugu yimid.
- Wasiirka Maaliyadda ee Soomaaliya Biixi Iimaan Cige ayaa magaalada Washington kaga qeybgalaya shirka arrimaha maaliyadda iyo deyn cafinta kaas oo ay martigeliyeen hay'adaha IMF iyo Bangiga Adduunka.
- Wasiirka Beeraha Soomaaliya Mudane Maxamed Cabdi Xayir (Mareeye), ayaa sheegay in ay ka shaqeynayaan fududeynta wax walba oo caqabad ku ah beeralayda Soomaaliyeed.



Somali Federal Republic
Ministry of Information, Culture and Tourism

- 6- Wasiirka Gaashaandhigga Soomaaliya Cabdulqaadir Maxamed Nuur Jaamac ayaa sheegay in Dowladdu ay xoogga saartay howlgallada ka dhanka ah Khawaarijta ee ka socda gobollada dalka si gacanta loogu dhigo deegaannada ay weli joogaan argagixisada.
- 7- Wasiirka Waxbarashadda Soomaaliya Mudane Faarax Sheekh Cabdulqaadir oo magaalada Brussels uga qeybgalay shir calami ah oo la xiriira arrimaha waxbarashada.
- 8- Wasiirka Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya Mudane Axmed Macallin Fiqi ayaa la kulmay ergeyga gaarka ah ee Finland ee Geeska Afrika.
- 9- Wasiirka cusub ee Amniga Qaranka General Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag), ayaa sheegay in dowladdu ay dardar galinayso howlgallada ka dhanka ah Khawaarijta ee ka socda dalka iyo xaqiijinta amniga deegaannada xorta.
- 10- Xafiiska Ergayga Madaxweynaha ee Arrimaha Qaxootiga iyo Socdaalka oo shir looga hadlayey sidii siyaasad qaran looga yeelan lahaa arrimaha tahriibka ku qabtay Muqdisho.
- 11- Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka Qaranka (SoDMA) ayaa cunno gargaar ah u dirtay degmada Ceeldheer iyo deegaannada hoostaga ee gobolka Galguduud.



Somali Federal Republic
Ministry of Information, Culture and Tourism

- 12- Danjiraha Soomaaliya ee Pretoria Mudane Maxamed Sheekh Isxaaq ayaa kulan la qaatay Wasiirka Arrimaha Dibedda ee Jamhuuriyadda Koonfur Afrika Dr. Naledi Pandoroo ay ka wada hadleen iskaashiga labada dal.
- 13- Wasaaradda Kalluumaysiga oo Muqdisho ka daahfurtay aqoon is-weydaarsi ku saabsan isku dubaridka dhaqaalaha baluugga ah.
- 14- Taliye Xigeenka Ciidanka Booliska S/Guuto Zakiya Xuseen Axmed oo Muqdisho ku soo dhoweysay Madaxa Xiriirka Arrimaha Dibedda ee Ciidanka Booliska Turkiga Mudane, Gökhan DEMIRTILA iyo Ku Xigeenkiisa Mudane Turgay OLGUN.
- 15- Maamulka Gobolka Banaadir iyo laamaha amniga oo ka shiray dardar gelinta sugidda amniga caasimadda.
- 16- Dab xooggan ayaa ka kacay dooxada deegaanka Dalsan ee degmada Dangorayo ee gobalka Nugaal, kaas oo loo badinayo in uu ka dhashay isbeddelka cimilada ee sii kululaanaysa.

=====DHAMMAAD=====